

Taageerista xirfadleyda caruurnimada hore iyo da'da dugsiga

Xarunta Minnesota ee Horumarinta Xirfadda waxay bixisaa:



- ◆ **Diiwaanka Minnesota (Minnesota Registry)**, oo la socda ictiraafana tababarka xirfadlaha iyo horumarka kobcinta mihiidda.
- ◆ **Shabakadda Mihiidda (Career Lattice)**, oo ictifaafta saacadaha tababarka aan qaabeysnayn, waxbarashada qaabeysan, iyo shahaadooyinka xirfadleyda daryeelka caruurnimada hore iyo da'ada dugsiga.
- ◆ **Aqbalaadda Tababarka iyo Tababaraha** oo ah habab loola jeedo abuurista iyo kormeerka nidaam aqbalaad tababare iyo tababar oo ah gobolka oo dhan si loo taageero xirfadleyda caruurnimada hore iyo da'da dugsiga.
- ◆ **Isku-daba-ridka Waxbarashada iyo Hagista Mihiidda** oo ay ku jiraan illo iyo qalab ay xirfadleydu isticmaali karaan si ay uga muuqato aqoontooda iyo farsamooyinkooda hadda, loo dajiyo hadafyo horumarin xirfadeed, loo hirgaliyo qorsheyaal waxbarasho iyo tababar, loona siiyo awood ay ku gaadhaan go'aamo ku saabsan horumarka mihiiddooda.

Himilo:

Annaga oo ka tirsan Nidaamka Horumarinta Xirfadda Gobolka Minnesota, hadafkayagu waa nidaam mideysan oon turxaan lahayn oo kor u qaadaya awoodda iyo farsamada kuwa daryeel iyo waxbarasho hore siiya ilmaha laga bilaabo dhalashada, oo ku aadan waxbarashada K-12, kuna xiran waxbarashada sare si loo taageero horumarka ilmaha iyo guul dugsi.

Hadafyo:

- ◆ In sii-hayeyaasha caruurnimada hore iyo da'da dugsiga la siiyo aqoonta, farsamada, qalabka, iyo kalsoonida loo baahan yahay si ay waxqabad fiican u siiyaan caruurta iyo qoysaska.
- ◆ In isku-daba-rid laga hirgaliyo dhamaan qaybaha sii-haynta iyo waxbarashada caruurnimada hore iyo da'da dugsiga.
- ◆ In la hubiyo in fursadaha waxbarasho ee adeeg-bixiyeyaashu ay ku qotomaan aasaas leh heerar sare xagga anshaxa iyo tayada kuna xidhan yihiin barnaamijka "Parent Aware" ee tijaabada ah.
- ◆ In la sugo in helitaanka dhamaan qaybaha nidaamku u furan yahay adeeg-bixiyeyaasha, tababareyaasha, iyo shuraakada beesha iyada oo aan la fiirin joqoraafi, xaalad dhaqaale, sinji, awood, qowmiyad, ama luqad.
- ◆ In tababarka aan shahaado lahayn lagu xidho waxbarashada sare iyada oo la marayo qiimeyn waxbarasho hore, cadeyn waxbarasho sare, iyo shabakadda mihiidda caruurnimada hore iyo da'da dugsiga.

Xirfadleyda Loo Adeego:

- ◆ *Sii-hayeyaasha ilmo ee qoys ah*
- ◆ *Barnaamijyada ku saleysan xarun (Macallin/Gargaare/Kalkaaliye)*
- ◆ *Maamuleyaal xarun*
- ◆ *Sii-haynta 'pre-kindergarten' (ECFE, School Readiness)*
- ◆ *Sii-haynta qoyska, saaxiib, ama deriska*
- ◆ *Head Start iyo Early Head Start*
- ◆ *Migrant Head Start*
- ◆ *Wax-ka-qabashada hore*
- ◆ *Tababareyaal iyo bareyaasha kale ee dad waaweyn ah*
- ◆ *Dugsi dadweyne iyo mid gaar, iyo barnaamijyo siiy-haynta da' dugsiga*

